# Kaalay I soo Raac

## Kitaab Waxbarasho

Daabacaadda Labaad, 2020

Come Follow Me

**Tim Green**

**www.come-follow-me.org**

# Mahadnaq

Waxaan si diirranaan leh ugu mahadnaqayaa cid kasta oo gacan ka geysatay mashruucan, dhiirrigelintooda, dhaleecayntooda iyo ducadoodaba. Sue waxa ay ku qaadatay boqolaal saacadood wax-kebeddelitaanka daabacaaddii ugu horreysay, sidoo kalena Jacob iyo Rachel waxay si hagar la'aana uga qayb qaateen daabacaadda koowaad iyagoo sidoo kalena ka qayb ahaa daabacaadda labaad. Michael waxa uu gacan ka geystay sawirrada halka David isna uu ka sawiray kuwa jaldiga. Ku dhowaad afartan Masiixiyiinta oo ka soo kala jeeda dalal kala duwan oo hoggaamiyayaal ah ayaa iyagana aragtiyohooda ka dhiibtay. Magacyadooda lama sheegi karo laakiin aan xuso D iyo J oon si gaadha ugu mahadnaqayo. Tarjumayaasha afka Jarmalka, Faarisiga iyo Carabiga iyaguna sidoo kale waxay bixiyeen talooyin wax ku ool ah. Waxaan sidoo kale si aada ugu mahadcelinayaa qoyskayga gaadh ahaan xaaskayga Rachel. Sanado badan waxaan ku soo wadaagnay farxad iyo qalbi-jab aan la wadaagnay dadka xerta ah ee nool goobo aan laga jeclayn oo adayg badan.


# Sharaxaadda daabacaaddan labaad

Daabacaaddan labaad (2017) waxay si aada ula mid tahay tii koowaad (2013), iyadoo ay bogagga iyo su'aaluhuba isku mid yihiin. Si kastaba ha ahaatee, waxaan saxay qaladaadka daabacaadda, sidoo kalena waxaan fududeeyay weedhaha fahankoodu adagyahay iyadoo sidoo kalena la raaciyay waxyaabo gacan ka geysan kara barista casharrada. Waxaan dib u habayn ku sameeyay qoraallada bogagga iv, 3 (su'aasha 8), 24 (s.11), 44 (s.15), 68 & 76 (dhaqangelinta), 98 (s.15,17) iyo 151 (hordhaca).

Waxaan asal ahaan kooraskan u qoray rumaystayaasha ka soo jeeda asal ahaan diin gaadh ah oo ku dhaqan dalalkooda, laakiin hadda waxa laga isticmaalaa kooraskan meelo badan oo ay ka mid yihiin dalalka Galbeedku. Arrinta kala duwanaanshaha fikirka adduunku way jirtaa laakiin waxa muhiim ah in hoggaamiyayaasha bixinaya koorsadani ay isku dayaan inay waxbarashadan la xidhiidhiyaan dhaqanka iyo aragtidada bulshadoodu kolba sida ay tahay.

Tani waa daabacaadda caalamiga ah ee afka Ingiriisiga. Waxaan adeegsaday Ingiriisida caalamiga ah meel kasta oo suurtogal ah iyadoo laga tix raacayo Ingiriisida dalka Ingiriiska. Daabacaaddan caalamiga ahi waxay diyaar ku tahay mareegta (come-follow-me.org), iyadoo sidoo kalena macluumaad ama warbixin ka bixinaysa tarjumaadaha luqadaha kala duwan ee buuggan. Daabacaad u gaadha UK ayaa iyana mar danbe la daabici doonaa.

Faa'iido kasta oo laga helo iibka koorsadan waxa loo adeegsadaa sii wadista iyo ballaarinta mushruucan.

Fadlan wixii talo iyo tusaale ah eed rabto in lagu kordhiyo ama laga jaro daabacaadaha mustaqbalka lasoo xidhiidh:


Tim Green, September 2017 comefollowmecourse@gmail.com


# Macluumaad dheeraad ah

Si aad u soo dejisato Hagaha, booqo bogga come-follow-me.org.


# Xuquuqda Daabacaadda

Waxa markii ugu horreysay lagu daabacay UK sanadkii 2013, Lulu.com. Daabacaadda labaad, 2017. Xuquuqda daabacaadda © Tim Green 2013

Akhristayaasha waxa loo oggolyahay inay koobiyeeyaan ilaa labo cashar oo ka mid ah buuggan ugu badnaan amaba ay casharrada tijaabooyinka ah ka daabacdaan bogga cadadka ay rabaan, balse lama oggola in la iibiyo. Fadlan ha koobiyayn wax ka badan labo cashar. Haddaad u baahato oggolaansho dheeraada igala soo xidhiidh comefollowmecourse@gmail.com. Dhammaan aayadaha koorsadan dhexdeeda, haddii aan si gaadha loo qeexin, waxa lagasoo qaatay Kitaabka Quduuska ah, tarjumadda afka Soomaaliga.



ISBN Nashqadaynta Jaldigu waa David Vosburg. www.zagmediaarts.com

Waxa loogu talogalay dadka xiisaynaya inay nolol cusub ku dhistaan Masiixa iyagoo ku dhex nool bulshadooda,

iyagoo sidoo kalena kasii mid ahaanaya qoysaskooda iyo bulshadoodii hore ee ay ka soo jeedeen inkasta oo ay jiri karaan is-fahan-waa iyo diidmo.


# Ugu horrayn Akhri Qodobadan!

Koorsada *Kaalay I soo Raac* waxay kaa caawinaysaa inaad ku korto oo ku xoogaysato rumaysashada Masiixa iyo bulshadiisa.

**Koorsadani waxay ay ugu horraysaa uun saddex qaybood oo kale!** Sidaas darteed fadlan raac talooyinkan:

- **Ugu horrayn**, dhammaystir su'aalaha loogu talo galay fahanka casharka (bogga vi ayaa kuu sheegaya sidaad u samayn lahayd);
- **Kadib**, waxaad casharka la falanqaysaa macallinkaaga ama koox;
- **Intaas kadib**, waxaad fulisaa 'Dhaqangelinta'.

Tallaabooyinkan oo la isu geeyay waxay *wax u tarayaan* maankaaga iyagoo sidoo kalena *beddeli* doona qalbigaaga oo kuu *horseedi* doona dhaqangelin iyo adeeg.




**Buuggan keligaa ha isku dayin inaad akhrisato** balse isku day inaad hesho qof kale oo kula akhrista oo rumaystayaasha ka mida sida macallin. Mar kasta ood shaqsi ahaan u akhrisato cashar, isku day inaad la kulanto macallinkaaga ama la taliyahaaga. Waxaad ka wada hadashaan waxaad wada barateen iyo sidii aad u dhaqangelin lahaydeen. Talo ka waydii qofka kula akhrisanaya arrimaha khuseeya noloshaada. Wada ducaysta oo isku dhiirrigeliya ku xoogganaanta Masiixa. Waxa sidoo kale faa'iido dheeraada aad helaysaa marka aad buuggan la akhrisato koox Masiixiyiin ah.

Haddii aad tahay macallin isticmaalaya koorsadan *Kaalay I soo Raac*, raadso **HAGAHA MACALLINKA** oo sharaxaya sida loo isticmaalyo koorsadan. Furayaasha dhaqanku waxay kaa caawin doonaan mawduucyada iyadoo si faahfaahsana loo falanqeeyay su'aalaha cashar kasta. Hagaha Macallinka waxaad lacag la'aan uga soo dejisan kartaa **come-follow-me.org** haddii kalena isagoo daabacan ayaad iibsan kartaa.

Arday iyo macallin kaad doontaba ahow, fadlan aragtidaada ii soo dir. Igu soo kordhi aragtidaada haddii aad jeceshay in wax is beddel lagu sameeyo ama la wanaajiyo amaba aad rabto inaad wax ka ogaato koorsooyinka kale.

Mahadsanid! Tim Green comefollowmecourse@gmail.com

come-follow-me.org

# Tusmada Kitaabka


| | Casharka | Bogga |
|---|---|---|
| | *Tacliimaadka Ardaygu Raacayo* | |
| 1 | Ka Mid noqoshada Xerta Masiixa | 1 |
| 2 | Nolosha Cusub ee Masiixa ku Jirta | 8 |
| 3 | Ilaaha Aabbaha ah | 15 |
| 4 | Masiixa oo lagu addeeco xoogga Ruuxiisa | 21 |
| 5 | La Hadlitaanka Ilaah | 28 |
| 6 | Waxa Ereyga Ilaah inoo Yahay | 35 |
| 7 | Xubnaha Kaniisadda Masiixa | 42 |
| 8 | Xubno ka Tirsan Labo Bulsho | 49 |
| 9 | Sababaha Cadaadiska ama Silica | 56 |
| 10 | Waajihidda Cadaadiska ama Silica | 63 |
| 11 | Rag iyo Dumar Lammaane ah | 70 |
| 12 | Xallinta Khilaafaadkeenna | 78 |
| 13 | Maragfur | 87 |
| 14 | Baabtiiska | 95 |
| 15 | Jidka Toosan | 102 |
| 16 | Qaynuunka Jacaylka | 109 |
| 17 | Soonka iyo Sakada | 116 |
| 18 | Qadarka iyo Faalka ama Sixirka | 124 |
| 19 | Isu-adeegis | 132 |
| 20 | U Xajkeenna Jannada | 140 |
| Lifaaqa 1 | Waqtiga aan la qaadanayo Ilaah | 149 |
| Lifaaqa 2 | Sida Ilaah loo gaadho | 151 |
| | Jawaab Celin | 154 |

# Waxyaabaha laga Rabo Ardayga

**1**

***Ku soo dhowow koorsadan!*** Waxay kaa caawin doontaa inaad noloshaada ku raacdo Sayid Ciise Masiix. Waxaan ahay macallinkaaga halkana waxaa ah dhowr arrimood oo kaa caawinaya inaad ka faa'iidaysato koorsadan.



**2**

Koorsadan ha ku koobin shaqsiyaddaada oo keliya-haddaad sidan yeesho waxyar uun baad ka faa'iidi. Waxaad raadisaa qof Masiixa raacsan oo xigmad leh oo la taliye kuu noqda. Markaad toddobaad kasta guriga ku akhrisato, la kulan la taliyahaaga iyo ardayda kale si aad u falanqaysaan wixii aad baratay.

**3**

Waxa ugu muhiimsan oo kale inaad waxaad baratay ku dhaqanto oo ku dabaqdo nolol-maalmeedkaaga. Cashar waliba waxa uu wataa waxyaabo ay tahay inaad ku dhaqanto ood dhaqangeliso.

1. Si taxaddar leh u akhri su'aal kasta.

2. Jawaabtaada ku qor ama ku sax [✓] meelaha bannaan

3. Markaad qorto jawaabtaada, waxaad jawaabaha ka hubin kartaa dhammaadka casharka.

4. Markaad dhammayso cashar kasta, waxaad eegtaa muraajacada si aad u xasuusato waxyaalaha muhiimka ah.

5. Su'aalaha qaar waxay ku waydiinayaan inaad fikirkaaga ku darsato xilliga falanqaynta. Ka jawaab su'aalahan oo diyaar u ahow dhiibashada aragtidaada.

6. Shanta cashar ee ugu horreeya waxaad u baahantahay buugga koorsadan oo keliya, laakiin wixii ka bilaabma casharka 6, waxaad u baahantahay inaad haysato Kitaabka Quduuska ah. Waxa jira tarjumado badan oo Kitaabka Quduuska ah gaadh ahaan afka Ingiriisiga, laakiin dhammaantood waxay ka yimadeen isla qorallada ku qoran luqadaha asalka ah oon is beddel lagu sameeynin. Koorsadan tarjumadda loo isticmaalay waxay ka ahaatay tarjumadda afka Soomaaliga ee Kitaabka Quduuska ah.

7. Dunida waxa ku sugan dad badan oo ka mida xerta Ciise Masiix oo sidoo kale asal ahaan aamminsanaa diinta aad adiga laftaadu aamminsanayd hadda ka hor. Dadkaasi waxay isugu jiraan kuwo aqoon leh iyo kuwo aan lahayn intaba. Koorsadan waxa loo qoray si fudud oo ay fahmi karaan dadka aqoonta leh iyo kuwo aan lahayniba. Qaabka qoraalka koorsadani waxa laga yaabaa inuu kuu fududaado laakiin waxa muhiim ah inaad ku dhaqanto. Ilaah waxa uu daneeyaa inaad isaga addeecdo oo keliya wax dan ahna kama laha halka uu garaadkaaga iyo fahanka caqligaagu gaadhsiisanyahay. Haddii aad waxbaristan dhaqangeliso oo Ilaah addeecdo waa hubaal inaad ka faa'iidi doonto.

8. Xasuusnow in la taliyahaagu uu waqtigiisa kuu hurayo si uu adiga kuu caawiyo. Sidaas darteed, waxaad ixitiraantaa oo dhowrtaa waqtiga aad u garateen falanqaynta inaanad ka dib dhicin iyo inaad dhammaystirto shaqada guri ee laguu diray.

***Ku bilow casharradan caawimaadda Rabbiga!***

# Casharka 1 Ka mid Noqoshada Xerta Masiixa



**Ujeeddada nolosheenna**

Labo nin ayaa sheekaysanayay. Mid iyaga ka mida ayaa yiri, "Waxaan aamminsanahay in Ilaaha Qaadirka ahi ii uumay ama ii abuuray inaan addeeco amarradiisa. Waxa uu soo diray nebiyo dadka ku hanuuniya Jidka Toosan. Haddii aan jidkaas raaco waxaan rajaynayaa inuu Ilaah dembiyadayda dhaafi doono oo i gelin doono jannada. Waana tan waa ujeeddada noloshayda."

Ninkii kale ayaa isna markiisa hadlay oo yiri, "Aniga laftaydu waxaan jecelay inaan Ilaah amarradiisa addeeco, laakiin kama baqanayo inuu cadaabta i geliyo. Waxa uu dhaafay dembiyadayda isagoo markaana ballanqaaday inuu igu soo dhowayn doono jannada. Haddaba, inta aan adduunkan korkiisa joogo waxaan ku faraxsanahay inaan isaga si shaqsi ahaana u garanayo anigoo dareensan inaan Ilaah jecelahay isna uu i jecelyahay. Waxaan jecelahay inaan isaga dartiis u noolaado oon maalin walba u hoggaansamo. Tan ayaana ah ujeeddada noloshayda."

Haddaad ka fikirto arrintan: Ma waxaad waafaqsantahay ninkan koowaad hadalkiisa mise kan labaad? Mise adigu waxaad leedahay ujeeddo kale? Waa maxay ujeeddada noloshaadu?



1 Marka aan ka fikirno nolosheenna waxa aan dareemi karnaa culays. Waxa ina cusleeya dhibaatooyinka ina haysta waqti xaadirka oo innagu kalifa inaan mustaqbalka ka warwarno. Injiilku waxa uu ina barayaa in Sayid Ciise uu dhammaanteen ina siiyay ballanqaad cajiib ah:

> "Ii kaalaya kulligiin kuwiinna hawshaysan oo culaabaysanow, oo anigu waan idin nasin doonaa." (Matayos 11:28)

Bal ka fikir Ciise Masiix oo ereyadan si shaqsi ahaaneed adiga kuugula hadlay! Ereyada aayaddan ku celceli ilaa inta aad ka xafiddayso. Kadib waxaad ku buuxisaa halkan ereyada ka maqan meesha bannaan:

"Ii kaalaya kulligiin kuwiinna ___________ oo__________, oo anigu waan idin nasin doonaa."

2 Sayid Ciise Masiix ereyadan ayuu ku hadlay markii uu dunidan yimid. Waxa uu dadka ugu baaqay "kaalay oo isoo raac". Dadkii qaarkood si farxad leh ayay ku ajiibeen oo way raaceen isaga. Kuwo kalena way diideen inay raacaan isaga. Masiixu maanta wuu noolyahay waxaanu inoo fidinayaa isla casuumaaddan. Maxay tahay casuumaddani? "Kaalay oo _________".

**Ka mid noqoshada xerta Ciise**

3 Aynu barano sida looga mid noqdo xerta raacsan Ciise Masiix. Waxa aynu ku dayan karnaa tusaalaha nin kalluumayste ah oo la dhaho Simoon Butros oo ka mid ahaa xertii Ciise Masiix raacday kuwii ugu horreeyay: aynu qisadan ka akhrino Kitaabka Quduuska ah:

Ciise waxa uu taagnaa badda Gennesaret; oo wuxuu arkay laba doonniyood oo badda ag taal; laakiin kalluumaystayaashii waa ka degeen oo shabagyadoodii ayay maydhayeen. Markaasuu fuulay doonniyihii middood oo Simoon lahaa, wuxuuna ka baryay inuu in yar dhulka ka durkiyo. Markaasuu fadhiistay oo dadkii wax ka dhex baray doonnidii. Goortuu hadalkii dhammeeyay ayuu Simoon ku yidhi, Meesha biyaha u dheer gee, oo shabagyadiinna ku dejiya si aad kalluun u heshaan. Simoon baa u jawaabay oo ku yidhi, Macallimow, xalay oo dhan ayaannu hawshoonnay, waxbana ma aannu qaban, laakiin hadalkaaga dartii shabagyada waan dejinayaa. Goortay waxaas yeeleen waxay ku qabteen kalluun tiro badan, shabagyadooduna way kala dillaaci gaadheen. Markaasay u gacan haadiyeen wehelladoodii doonnida kale ku jiray inay yimaaddaan oo caawiyaan. Wayna yimaaddeen, oo waxay buuxiyeen labadii doonniyood. Sidaa darteed ayay u dhowaadeen inay degaan. Laakiin Simoon Butros goortuu waxaas arkay, ayuu Ciise jilbihiisa isku tuuray, oo wuxuu ku yidhi, Sayidow, waxaan ahay nin dembi leh, ee iga tag. Maxaa yeelay, isaga iyo kuwii la jirayba, waxay la yaabeen kalluunkii badnaa oo ay qabteen... Ciisena wuxuu Simoon ku yidhi, Ha baqin, hadda iyo hadhowba dad baad jillaabi doontaa. Markay doonniyahoodii dhulkii geeyeen, ayay wax walba ka tageen, markaasay raaceen isaga. (Luukos 5:1-11, Kitaabka Quduuska ah)

Markaad akhrido aayadahan, waxaad saxdaa (✓) sanduuqan ☐ halkaana ka sii wad.

4 Waxay u muuqataa in Simoon Butros uu qaaday afar tallaabo si uu uga mid noqdo xerta Ciise. Isla maantana dadku afartan tallaabo ayay qaadi karaan si u raacaan Sayid Ciise. Aynu barano haddaba afartan tallaabo waxay yihiin.

**Tallaabada koobaad: Ka soo noqoshada dembiga**

Markii Simoon uu arkay mucjisadii kalluunka, waxa furmay indhihiisii. Waxa uu yaqiinsaday quduusnaanta Sayid Ciise iyadoo Butrosna uu isu arkay dembiile. Muxuu Butros haddaba ku yidhi Ciise? "Sayidow iga tag, waxaan ahay ___________________" *(eeg aayadaha kor ku xusan)*

5 Simoon waxa uu garawsaday inuu yahay 'dembiile'. Dabcan dembi dil ah muugaysanin amaba kumuu dhicin sino xaaladdan iyada ah. Laakiin Ciise waxa uu arki karayay waxa ku jira qalbigiisa. Xaaladdan iyada ahna, Butros Sayid Ciise kama uuna qarin karin sirtiisa u qarsoon iyo fikirradiisa sharka ah ee ku qarsoon qalbigiisa.

Adiga xaaladdaadu waa sidee? Maxay yihiin siraha kuu qarsoon eed aadka uga damqan lahayd haddii bannaanka lasoo dhigo oo masaajidka lagaaga qayliyo? Waxa laga yaabaa sirtaada inaad ka qariso dadka deriskaaga ah iyo qoyskaaga, laakiin waxa hubaal ah inaanad sirtaada ka qarin karin Sayid Ciise Masiix. Waxa uu sida dhakhtarku raajada ugu arko lafaha jidhka ee qarsoon ugu arki karaa wax kasta oo ku jira qalbigaaga!

- ***Halkan ku yara hako, waxaanad Ciise Masiix waydiisataa inuu ku tusiyo meel kasta oo mugdi noloshaada kaga jiro.***

6 Waxa xaqiiqo ah in qof kastaa uu sameeyo dembi. Waana sida uu sheegay gabayaagii Cumar Khayum markii uu yidhi,

"Ii sheeg ninka aan adduunkan dhexdiisa dembaabin
Ii sheeg halka ay joogaan kuwa aan dembaabini,
Qalad waan kaa galaa adiguna waad iga gashaa,

Haddaba ii sheeg farqiga aniga iyo adiga inoo dhexeeya."

Ma jirtaa cid Ilaah ka qarin karta dembiyadooda? [ Haa / Maya] *(goobaab jawaabta saxda ah)*

7 Waxa hore laguu soo baray in Ilaah uu jecelyahay kuwa is daahiriya isla markaana necebyahay kuwa qaladaadka sameeya. Laakiin Ciise oo ah kan quduuska ahi miyuu nacay Simoon oon quduus ahayn? Waxa layaab leh iyada oo Ciise aanu Simoon ku nicin dembiilanimadiisa? Muxuu Ciise ku yidhi Simoon? *(eeg aayadaha oo dooro adoo saxaya jawaabta saxda ah:)*

___ a) 'Iga tag'

___ b) 'Ha baqin'


8 Simoon waxa uu dareemay nafis iyo raaxo markii uu maqlay Ciise oo leh 'Ha baqin'! Haddii sida Simoon oo kale aad u malaynayso inaad tahay dembiile, qalbigaaga qabooji, waxaadna ogaataa in Ciise inuu naftiisa u bixiyay adiga awgaa. Waxa uu isagu diyaar u yahay inuu ka cafiyo oo si buuxda kaaga nadiifiyo dembiga!

Laakiin diyaar ma u tahay inaad aqbasho hadiyaddiisa deeqsinimadu ku dheehantahay? U fiirso labadan qof ee kala duwan:




Labadan nin kee buu Ciise nadiifin doonaa: ma kan isla weyn mise kan is hoosaysiiyay ee is dhul dhigay dembigiisana qirtay? ______________________________________

9 Sayid Ciise wuxuu yidhi, "inaan dembiilayaashase *toobadda* ugu yeedho ayaan u imid" *(Luukos 5:32)*. 'Toobaddu' waxay la macno tahay dib uga soo noqoshada jidkii hore. Eeg muuqaalka labadan nin:



**1.** **2.**

a) Labadan nin midkee toobadkeenay, 1. mise 2.? ____

b) Midkoodee ku sii socda jidkiisii hore, 1. mise 2.? _____

10 'Toobadkeenku' maaha oo keliya inaan ka qoomamayno dembiyada aan ku dhacnay. Waxa uu ka dhiganyahay in gebi ahaanba <u>dembiga laga soo noqdo</u> oo faraha lagala baxo, sida ka muuqata muuqaalka ninka 2. Haddaba, maxaa caddayn u ah toobadkeenka dhabta ah? *(dooro jawaabta saxda ah oo horteeda sax)*

___ a) Inaan la qoomamayn noloshaadu dembiga ay ku jirto
___ b) Inaad dembiga ka qoomamooto balse aanad qaab nololeedkaaga beddelin
___ c) Inaad gebi ahaanba ka soo noqoto dembiga ood beddesho qaab-nololeedkaaga

11 Maxay ahayd tallaabadii u horreysay ee Simoon qaado si uu uga mid noqdo xerta Ciise? Ka soo noqoshada _____________.

**Tallaabada labaad: Fahan Qiimaha**

12 Tallaabada xigta ee Simoon waxay ahayd fahmitaanka qiimaha ay ku kacayso in la raaco Ciise. Simoon waxa hortimid doorasho adag. Waxa ay ahayd inuu labo arrimood kala doorto:




Muxuu Simoon fahmay? ________ raacitaanka Masiixa.

13 Ciise Masiix qiimaha uu ku kacayo raacitaankiisu waxa uu ku xusay masaalkan:

"Boqortooyada jannadu waxay u eg tahay baayacmushtari luul wanaagsan doonaya. Goortuu xabbad luul ah oo ganac weyn helay, ayuu baxay, oo wuxuu lahaa oo dhan ayuu iibiyey oo iibsaday." (Matayos 13:45-46)

Haddaad tahay mid raacsan Ciise, maxay yihiin waxyaalaha ugu daran ee ay Masiixinimadu kaa galaafanayso? Sax wixii aad halkan ka aragto inaad ku waayayso raacitaanka Masixa awgii: *(jawaabtu adigay kugu koobantahay)*

___ a) Sumcadda aad ku dhex leedahay bulshadaada
___ b) Shaqadaada ama ganacsigaaga
___ c) Qoyskaaga
___ d) Hantidaada ama waxaad dhaxal u leedahay
___ e) Waxyaalo kale *(Halkan ku qor)* ____________________

14 Laakiin abaalmarintu waxan oo dhan way u qalantaa. Wax kasta oo aan Masiixa dartiisa nafteenna ugu hurno, waa inaan xasuusano in isaga laftiisu uu sameeyay nafhurista ugu weyn markuu innaga aawadeen ugu dul dhintay iskutallaabta!

"laakiinse Masiixu waa inoo dhintay intaynu weli dembiilayaal ahayn, oo sidaasuu Ilaah jacaylkiisii inoogu muujiyey." (Rooma 5:8)

Haddaba, yaa bixiyay qiimaha weyn ee qaaliga ah: Innaga mise Masiixa? _________

*Casharrada 9 iyo 10 waxaan ku baran doonnaa sida Ciise Masiix innooga caawinayo waajihidda cadaadiska.*

**Tallaabada Saddexaad: Masiixa ku kalsoonow**

15 Si uu u noqdo xerow Ciise raaca, Simoon waxay ahayd ugu horrayntii inuu ka toobadkeeno dembiga, marka labaadna inuu fahmo qiimaha ay ku kacayso xernimadu. Kadibna waxa xigtay tallaabada saddexaad oo ah: "ku kalsoonaanta Masiixa".

Su'aasha 3, waxaad mar kale akhridaa jumladda ugu danbaysa aayadaha. Maxay Simoon iyo asxaabtiisii sameeyeen iyagoo ka jawaab celinaya baaqii ama dalabkii Ciise? *(buuxi meelaha bannaan)*

"Markay doonniyahoodii dhulkii geeyeen, ___________ markaasay _____________ isaga."

16 Simoon waxa uu si buuxda isug u halleeyay macallinkiisa cusub ee Ciise.

Sidee aan ugu kalsoonaan karnaa qof oo isugu dhiibi karnaa nolol maalmeedkeenna? Tusaale waxaan u soo qaadan karnaa:

- ✓ ***Ilmaha yar ee daalan*** waxa uu isku halleeyaa gacmaha aabbihii inuu qaado oo seexiyo
- ✓ ***Qofka bukaanka ah*** waxa uu isku halleeyaa oo aamminaa dhakhtarka siinaya daawada.
- ✓ ***Qofka rakaabka ahi*** waxa uu isku halleeyaa gacanta wadaha baska ama gaadhiidka marka loo baxayo safar khatar leh.

Sida ilmaha yar, ama qofka bukaanka ah ama rakaabka ah, waxa aynu innaguna isku halleynaa oo nafteenna ku aamminaa Ciise marka aynu isaga rumaysano. Waxa aan ugu kalsoonaanaa innaga oo aamminsan inuu ina hanuunin doono isla markaana ina dhowri doono. Waxa aynu u addeecnaa inuu yahay sayidkeenna iyo macallinkeenna.

Maxay tahay tallaabada saddexaad ee la qaadayo si loo noqdo qof raaca Masiixa?

1. Ka dheerow oo ka leexo dembiga
2. Fahan qiimaha ay ku kacayso arrintaasi
3. __________ isuna dhiib Masiixa

17 Markii uu isku halleeyay ee usu dhiibay Masiixa dabadeed, Simoon Butros waxa uu la socdaalay oo raacay Ciise saddexdii sanno ee xigay. Waxa uu macallinkiisa la qaybsaday farxad iyo murugo intaba. Waxa uu arkay Ciise oo bogsiinaya dad buka oo sidoo kalena dad dhintay dhimashada ka sara kicinaya! Waxa uu bartay in dadka loo jeclaado sidii Ciiseba u jeclaaday. Si aayar aayar ahna waxa uu Simoon ugu ekaanayay oo u dhaqmayay sida macallinkiisa Ciise oo kale. Markii danbena waxa magaciisa uu ku can-baxay uu noqday Butros.

Sidee Simoon Butros ku noqday xer oo raaca Ciise Masiix? *(horteeda sax jawaabta saxda ah)*

___ a) Isagoo Masiixa isu dhiibay iskuna halleeyay
___ b) Isagoo akhriyay qirasho iimaan cusub (*sida ashahaada oo kale*)

18 Sida aad ogtahay, qofka tababbarka qaadanayaa waxa uu daawadaa oo wax ka bartaa isla markaana ku daydaa macallinkiisa isagoo sameeya waxa uu sameeyo. Sidan ayayna ahayd sidii Simoon Butros uu ku noqday mid ku dayda oo wax ka barta isla markaana noqda xerta raacsan Ciise.

Innaguna sidoo kale marka aan raacayno Ciise waxa aan noqonaynaa kuwo tababbar qaata iyadoo macallinkeennuna Ciise yahay. Inkastaa oo aynaan indhaheenna ku arki karin Ciise maanta haddana waynu ku dayn karnaa isaga marka aynu raacno ee u hoggaansano.

Maxay tahay tallaabada saddexaad ee la qaadayo marka la raacayo Ciise? __________ isuna dhiib Masiixa



**Tallaabada afraad: Ku biir bulshada Masiixa**

19 Markii Simoon uu addeecay baaqa Masiixa, muu ahayn keligiis. Waxa uu ku biiray bulshada Masiixa. Xerta Ciise Masiix waxay u wada noolaayeen si wada jirta iyagoo koox ah oo noloshooda wadaagayay. Waxa ay ka soo kala jeedeen qaabiilooyin iyo bulshooyin kala gedisan iyo heerar kala duwan oo xagga nolosha ah. Laakiin waxa ay barteen inay is-jeclaadaan.

Tani may ahayn arrin fudud. Mararka qaar waxa ka dhex aloosmay muran laakiin way xalliyeen waxyaabihii ay isku hayeen iyagoo is cafiyay. Simoon Butros waxa uu bartay in kuwa ka mid noqda xerta Masiixu ay sidoo kale ku biiraan ________________ Masiixa.

***Ku biirista bulshada Masiixu waxay lagama maarmaan u tahay rumayste kasta! Wax dheeraada oo arrintan ku saabsan waxaan ku baran doonnaa casharka 7.***

20 Ciise Masiix waxa uu Simoon Butros ugu yeedhay inuu isaga soo raaco. Maxay tahay afarta tallaabo ee arrintani ay koobsanayso?

1. ____________ dembiga
2. ____________ qiimaha
3. Masiixa oo ____________
4. ____________ bulshada Masiixa



Ugu danbayn, casharka maanta maxaad shaqsi ahaan ka baratay ee uu kaaga dhiganyahay?

- ***Waxa laga yaabaa inaad hore uga mid ahayd xerta Masiixa raacsan?*** Haddii sidan ay tahay, koorsadani waxay kaa caawinaysaa inaad ku korto Masiixa.
- ***Waxa laga yaabaa inaad imminka diyaar u tahay ka mid noqoshada xerta Masiixa?*** Si gaadha ula hadal la taliyahaaga, isaga ama iyada ayaana kaa caawin doona qaadista tallaabadan.
- ***Waxa laga yaabaa inaad u baahantay waqti dheeraada ood kaga fikirto qaadista tallaabadan muhiimka ah?*** Waa caadi taasina, laakiin ha dib dhigin go'aan qaadashadaada, waayo waqtiga ayaa kaa dhici kara. Sii wad barashada koorsadan laakiin waxaad wax badan ka faa'iidaysaa markaad go'aansato inaad raacdo Masiixa.

**DHAQANGELINTA CASHARKA 1**

Toddobaadkan dhexdiisa, waxaad ka fikirtaa su'aalahan. Ma waxaad horeba uga mid ahayd xerta Masiixa? Mise waxaad diyaar u tahay inaad imminka ka mid noqoto xerta Masiixa? Mise waxaad u baahantahay inaad waqti dheeraada qaadato oo arrintan si mug leh uga fikirto?

Samee imminkana muraajacada.

**MURAAJACADA CASHARKA 1**

1. Maxay tahay casuumaadda la yaabka leh ee uu xafidinayo Ciise Masiix ee ku sugan Matayos 11:28? *(eeg su'aasha 1 haddii aanad xasuusan karin)*

"Ii kaalaya kulligiin kuwiina________________________________________________."

2. Magacaw afar tallaabo oo loo baahanyahay si loo raaco Masiixa:


1. ______________________
2. ______________________
3. ______________________
4. ______________________

**JAWAABAHA CASHARKA 1**

| | |
|---|---|
| 1 | hawshaysan, cullaabaysan |
| 2 | i soo raac |
| 3 | akhri aayadaha |
| 4 | dembiile |
| 5 | jawaab celin shaqsi ahaaneed |
| 6 | Maya |
| 7 | b) |
| 8 | a qof is hoosaysiiya |
| 9 | a) qofka 2 b) qofka1 |
| 10 | c) |
| 11 | dembi |
| 12 | qiimaha |
| 13 | jawaab celin shaqsi ahaaneed |
| 14 | Masiix |
| 15 | ka tageen... raaceen |
| 16 | ku kalsoonow |
| 17 | a) |
| 18 | ku kalsoonow |
| 19 | bulshada |
| 20 | 1. Toobadkeen 2. Fahanka 3. Ku kalsoonow 4. Ku biir |



# Casharka 2 Nolosha Cusub ee Masiixa ku Jirta




1 Arrintan wax ku saabsan aan ka barano qayb ka mida Kitaabka Quduuska ah oo la dhaho, Warqaddii Koowaad ee Butros ama 'Butros Koowaad'. Simoon Butros oo ah kii aynu casharkii horena ku soo aragnay ayaa qoray warqaddan iyadoo Ruuxa Ilaah uu hagayo. Warqaddu waxay ku bilaabmaysaa sidan:

"Anigoo ah Butros oo ah rasuulkii Ciise Masiix" (1 Butros 1:1)

Muxuu yahay mansabka shaqo ee Butros halkan uu ku sito? *(dooro oo sax jawaabta saxda ah)*

___ a) xerow ___b) rasuul ___c) nebi

2 Kitaabka Quduuska ahi sida uu tilmaamayo, ereyga 'rasuul' waxa macnihiisu tilmaamayaa qof loo diray shaqo gaadha (maaha qof uu ku soo degayo kitaab gaadh ahi). Sayid Ciise waxa uu doortay labo iyo toban nin oo uu u diray hawl gaadha. Tan ayay ahayd sababta nimanka loogu magacaabay 'rasuullo'. Waxa iyaga hoggaamiye u ahaa rasuul Butros.

Qaybta ka midka ah ereyga Ilaah ee koorsadan aan ku baran doonno maxaa lagu magacaabaa? Warqaddii koowaad ee rasuul ______

3 Aayadda koowaad ee 1 Butros waxay inoo sheegaysaa cidda Ilaahay u adeegsaday qoritaanka warqaddan. Waxa kale oo ay inoo sheegaysaa ciddii loo qoray oo ahaa Masiixiyiin ku sugnaa dhulka maanta loo yaqaanno Turkiga. Sida warqaddan ku xusan, waxa dadkan lagu magacaabay "dadka Ilaah doortay".

- ***Halkan ku hako oo Ilaah ugu mahadnaq inuu naga dhigay dadkiisa uu doortay!***

4 Aayaddu sidoo kale waxay dadkan ku magacawday "qariib". Waxa laga yaabaa inaad ku nooshahay meel ka fog dhulkaagii hooyo amaba aad ku nooshahay dalkaaga laakiinse aad ka soocantahay iyaga maadaama oo qoyskaagu ku diideen. Waa arrin runtii aad u adag tani!

Laakiin xagga Ilaah maxay tahay magaca la inooga yaqaan ee aynu ka haysano? Waxaynu nahay _________

**A) Aqoonsigeenna cusub**

5 Haa, waxaynu nahay dadka Ilaah doortay! Waxa laga yaabaa bulshadeenna ama dadkeennu inay ina diidaan, laakiin *"haddii Ilaah inala jiro yaa inaga hor imaan kara?... Yaa ashtakayn doona kuwa Ilaah doortay"* (Rooma 8:31, 33). *"Ilaahna miyaanu xaq siin doonin kuwuu doortay oo habeen iyo maalinba u qayliya?"* (Luukos 18:7)

Haddii aynu nahay xerta Masiixa, waa maxay aqoonsigeenna cusubi? (*sax horteeda jawaabta saxda ah*)

___ a) dadka Ilaah doortay ___ b) gaalo ___ c) murtadyo

6 Aayadda xigtaa waxay leedahay *“oo lagu doortay aqoontii Ilaaha Aabbaha ahu hore u sii ogaa”* (1 Butros 1:2)


| |
|---|
| Waxa jirtay sheeko ku saabsan wiil yar oo aan waalid lahayn waxaana soo koriyay reer kale oo ilmohooda ka dhigtay. Maalin maalmaha ka mida wiilkii yaraa waxa ku majaajillooday wiilal yaryar oo kale iyagoo ku tilmaamay midaan waalid lahayn. Wiilkii yaraa waxa uu ku jawaabay, “Waxaan dareemayaa inaan idinka sharaf badanahay oo si gaadha la ii sharfay. Idinka aabbayaashiin idin may dooranin laakiin aniga aabbahay si gaadha ayuu ii doortay oo iiga dhigay wiilkiisa!” |

Waa sharaf weyn in Ilaah uu ku doorto! Arrintan ma waxa aynu ku kasbanay camalladeenna suuban? [ Haa / Maya ]

7 Ilaah jacayl uu inoo qabo awgeed ayuu innagu doortay ee maaha waxaynu mutaysanay. Waxa iyana sidoo kale run ah inaan doorano inaan Ilaah raacno innagoo u sii marayna Ciise Masiix. Waxa markaas jirta in doorashada Ilaah iyo teennu ay wada shaqeeyaan.

Waa maxay aqoonsiga cusub een ku haysano Masiixa? Waxaynu nahay dadka Ilaah___________.

**B) Dhalashadeenna Cusub**



8 Ma taqaanaa farqiga u dhexeeya diirta iyo dirxiga? Inkastoo dusha ay aad isga eegyihiin, waxa jirta in farqi weyni u dhexeeyo labadooda. Dirxigu wuu gurguurtaa ilaa laga gaadhayo xilligii uu ka dhiman lahaa waanu dhintaa. Laakiin diirta waxa ku yimaadda isbeddel cajiib ah. Halkii ay sidaa uga dhiman lahayd, maxay noqotaa oo ay isu beddeshaa? *(eeg sawirka)* ____________________

9 Miyaanay la yaab ahayn in diir foolxun oo caleenta dusheeda xamaarataa inay isu beddesho balanbaallis qalimo leh oo qurux badan oo samada heehaabta? Waxa ay ka dhigantahay sida dhalasho cusub oo kale oo lagu noqonayo gebi ahaanba abuur cusub.

Muxuu yahay isbeddelka ku yimaadda diirtu? Waa nooc ka mida ‘_________ cusub’

10 Weli miyaad ka mid noqotay xerta Ciise Masiix? Marka aad muraayadda isku eegto <u>dusha</u> waxaad ka tahay qofkii aad ahayd. Laakiin waxa xaqiiqo ah inaad <u>gudaha</u> kala mid tahay sida diirta ama dirindiirta isu beddelaysa balanbaallista. Isbeddelkan cajiibka ah ee lagu helo Masiixa awgiis waxa uu la mid yahay oo lagu magacaabaa ‘dhalasho cusub’.

Waa ayo dadka hela dhalashada cusubi? (*dooro oo sax jawaabta saxda ah horteeda*)

___ a) dhammaan dadka ku nool dalkeenna

___ b) kuwa si gaadha isugu halleeya Masiixa

___ c) kuwa ka dhashay qoys Masiixiyiin ah

11 Aayadda xigta ee 1 Butros waxay wax inooga sheegaysaa dhalashadan cusub:

“Ammaanu ha u ahaato llaaha ah Aabbaha Rabbigeenna Ciise Masiix. Naxariistiisa badan aawadeed ayuu mar kale ina dhalay inaynu rajo nool ku helno sarakiciddii Ciise Masiix ka soo sara kacay kuwii dhintay.” (1 Butros 1:3)

Aayaddani siday ina barayso, yaa ina siiyay dhalashadan cusub?

___ a) Ilaah baa inagu siiyay nimcadiisa weyn

___ b) waxaynu ku helnay camalkeenna suuban awgiis

___ c) waxaynu ku helnay ducada nin quduus ahi inoo duceeyay

**Miyaad weli heshay Dhalashadan Cusub?**

12 Dhalashadan Ilaah waxa uu u fidinayaa cid walba, laakiin qof waliba ma hesho.

Eeg saddexdan qof ee bukaanka ah waxa uu dhakhtarku u sheegayo iyo sida jawaabahoodu u kala duwanyihiin:




Saddexdan qof ee bukaanka ah, A, B ama C, keebaa heli doona caafimaad? _________


13 Sidoo kale, saddexdan qof keebaa dhalasho cusub ku helaya Masiixa?

*(sax jawaabta saxda ah horteeda)*

___ a) Kan odhanaya, "Masiixow, waan ku kalsoonahay wax baristaada, laakiin waxaan ka baqanayaa inaan noloshayda kugu aqbalo"

___ b) Kan odhanaya, "kuma rumaysanayo"

___ c) Kan odhanaya, "Sayid Ciisow waan ku rumaysanahay. Waan kugu kalsoonahay ee noloshayda soo booqo".




**C) Dabiicaddeenna Cusub**

14 Waxa aan soo baranay wax ku saabsan 'aqoonsigeenna cusub iyo 'dhalashadeenna cusub' marka aynu nahay xerta Masiixa. Ciise Masiix sidoo kale waxa uu ina siiyaa 'dabiicad cusub', oo ah dabiicaddiisa cusub ee innaga inaga dhex shaqaynaysa.

Dad badan oo hore u haysan jiray diinta aad haysatay oo hadda ka mid noqday xerta Masiixa ayaa jira iyagoo noloshooda is beddelka ku dhacayna ay sidan tusaale ahaan u qeexeen:

| | |
|---|---|
| ***Cabdi:*** | "Nolosha aan ku helay Masiixu waa mid raaligelin iyo farxad leh" |
| ***Xasan:*** | "Ciise waxa uu siiyay nabad iyo farxad" |

***Sharmarke:*** “Warwarkii iyo walaacii way iga ba’een”

***Sacdiyo:*** “Cabsidii iyo culayskii i saarnaa way iga baxeen”

***Maryan:*** “Waxaan ogahay in Ilaah igu aqbalayo sidaan ahay”

***Axmed:*** “Noloshaydii hore waxay lahayd mid mugdi ku dhisan khamri cabis, dhillaysi iyo dembi miidhan. Midabka imminka noloshaydu leedahayna waa iftiin, waxaana ka buuxa farxad iyo nabad”

*(waxa laga soo xigtay buugga ‘Jesus More than a Prophet’ oo uu qoray Ralph Wotton)*

Dhammaan dadka halkan lagu soo qaatay waa kuwa jira oo xay ah. Muxuu yahay isbeddelka noloshooda ku yimid? *(sax jawaabta saxda ah horteeda)*

___ a) Ciise Masiix waxa uu siiyay dabiicad cusub oo wanaag leh

___ b) Noloshoodii way ka sii xumaatay siday markii hore ahayd

___ c) Waxay ku sii jireen dabiicaddoodii hore, isbeddelna may arag

15 Ciise Masiix waxa uu kuwa isaga raaca oo dhan siiyay dabiicaddiisa cusub. Sida dadkaas oo kale, innaguna sidoo kale waxaan heli doonnaa dareen wacan oo farxad iyo nabad leh. Laakiin waxa muhiimka maaha dareenkeenna oo keliya. Waxa taas kasii muhiimsan isbeddelka uu Ciise ku keenayo dabiicaddeenna. Halkan waxa aynu ka arkaynaa sidoo kale tusaaleyaal run ah oo dheeraada:

***Xasan:*** “Ciise wuxuu iga caawiya inaan iska daayo sigaar cabistaydii”

***Sharmarke:*** “Ciise wuxuu beddelay dabiicaddaydii kibirka iyo isla weynida ahayd”

***Mustaf:*** “Cabsidii iyo hanyaraantii aan iska qabay way iga baxday”

***Cumar:*** “Rabshadii iyo dhibkii aan dadka ku hayay waan iska daayay”

***Cali:*** “Waxaan bilaabay inaad dadka kale aad u daneeyo”

***Hiirad:*** “Adeegitaanku wuxuu iga saaray kibirkii iyo danaysinimadii aan lahaa”

***Raage:*** “Waxaan bartay isku hallaynta Rabbiga iyo daacadnimo inaan ku shaqeeyo”

***Farxiya:*** “Waxaan jecelay inaan dadka kale ku soo hoggaamiyo jacaylka Masiixa”

*(waxa laga soo xigtay ‘Jesus More than a Prophet’oo uu qoray Ralph Wotton)*

Waa maxay isbeddelka dhabta ah ee Masiixu noloshaada ku keenay? Qor fikirka aad arrintaa ka qabto si aad ula wadaagto dadka kale xilliga falanqaynta:

___________________________________________________________

___________________________________________________________

___________________________________________________________

16 Waxba ha ka warwarin haddii aanad isbeddelada kor ku xusin markiiba aanad helin. Waxa dhici doonta inay si qunyar ah u yimaaddaan marka aad sii waddo ku koritaanka Masiixa. Ilmaha yar ee dhallaanka ah waqti ayay ku qaadataa inuu koro oo qaangaadh noqdo, sidoo kalena waqti dheer ayay qaadataa in qaangaadh xagga ruuxa laga noqdo ka dib marka la helo ‘nolosha cusub’.

Laakiin maadaama oo Ciise kugu dhex noolyahay, ‘dabiicaddee’ ayay tahay inay kaa muuqato?

___ a) Dabiicaddaadii hore ee dembigu ka buuxay

___ b) Dabiicaddaada cusub ee Masiixa ku jirta

**Dagaalkeenna ruuxiga ah**


17 Inkastoo oo aynu dabiicad cusub ku helnay Masiixa, waa inaynu dagaal ruuxi ah kula jirno dabiicaddeennii hore ee dembigu ka buuxay - inta nolosheenna ka dhiman! Ereyga Ilaah waxa uu inagu amrayaa sidan:

"Haddaba dila xubnihiinna dhulka yaal, kuwaas oo ah sino, iyo wasakhnimo, iyo kacsi xaaraan ah, iyo damac shar ah, iyo hunguri xumaan, taas oo ah sanam caabudid. Kuwaas ayaad waagii hore ku socon jirteen markii aad waxyaalahaas ku noolaan jirteen. Laakiinse haatan iska fogeeya waxyaalahan oo dhan, kuwaas oo ah xanaaq, iyo cadho, iyo xumaan, iyo cay, iyo hadalka ceebta ah oo afkiinna ka baxa. Been ha isu sheegina, waayo, idinku waad iska xoorteen dabiicaddii hore iyo falimaheediiba, oo waxaad huwateen dabiicaddii cusbayd taas oo loo cusboonaysiinayo aqoon sida ay tahay u ekaanta kan iyada abuuray." (Kolosay 3:5,7-10)

Siday dhigayaan aayadaha kor ku xusan, *(goobaabi jawaabta saxda ah)*

a) Dabiicaddee ayaan iska xoornay? [dabiicaddii hore / dabiicadda cusub]
b) Dabiicaddee ayaan huwanay? [dabiicaddii hore / dabiicadda cusub]

18 Sawiradan soo socdaa waxay muujinayaan xerta Ciise Masiix oo waxyaabo kala duwan sameeynaya. Meelaha bannaan ku buuxi adoo qoraya, 'hore' haddii qofku uu ku dhaqmayo dabiicaddiisii hore, ama 'cusub' haddii ay ku dhaqmayaan dabiicaddooda cusub:




qofka a): ____dabiicad

qofka b): _____ dabiicad

qofka c): _____dabiicad

qofka d): ___ dabiicad

19 Maalin walba dabiicaddeenna cusub ee aynu ku helnay Masiixu waxa ay dagaal kula jirtaa dabiicaddeennii hore ee dembigu ka buuxay. Nin beerale ayaa loollanka noocan ah waxa uu ku tilmaamay: "Waxaan dareemaa in gudahayga ay ku dagaallamayaan labo neef oo riyo ah oo mid caddaan tahay midini madowdahay." Waxa markaa la waydiiyay "labada riyood midkooda guulaysta?" Waxa uu ku jawaabay, "labada kolba kii aan aad u dhergiyo"!

- ***Halqabsiga uu beeraluhu bixiyay ka fikir! Ri'da madow waxay ka dhigantahay dabiicaddeennii hore halka tan cadina ay ka dhigantahay dabiicaddeenna cusub. Midkoodee ayaa haddaba noloshaada ku dhex guulaysanaya? Maxaa sababay? U diyaargarow xilliga falanqaynta.***



Casharka maanta sida aynu ku baranay, aynu xasuusano saddex faa'iido oon ku haysano Masiixa:

- Innagoo ah dadka Ilaah waxaan haysanaa aqoonsi cusub
- Waxaynu helnay dhalasho cusub, sida diirta ama dirindiirtu isugu beddesho balanbaallis oo kale
- Caawimaadda Masiixa awgeed, dabiicaddeenni hore waxa beddelaysa dabiicaddeenna cusub

20 Aayaddan soo socota ee ka mida ereyga Ilaah waxay soo koobaysaa waxa aynu maanta baranay:

"Haddii qof Masiix ku jiro waa abuur cusub, oo waxyaalihii hore way idlaadeen bal eega, wax waliba way cusboonaadeene" (2 Korintos 5:17)

Meelaha bannaan buuxi oo aayaddan si fiican u xafid:


"Haddii qof _________ ku jiro, waa _____ cusub, oo _____ way idlaadeen, wax walibana way ____________ !" (2 Korintos 5:17)

Imminkana ducadan ku ducayso:

"Rabbiyow, waxaan kaaga mahadcelinaynaa inaad nimcadaada weyn ayaad nagaga dhigtay dadkaaga aad dooratay!

Waxaan kaaga mahadnaqayaa inaad i siisay dhalasho cusub iyo dabiicad cusub.

Awoodda Masiixa, waxaad igaga caawisaa inaan maalin walba kula dagaallamo dabiicadii hore ee dembiga. Aamiin."



**DHAQANGELINTA CASHARKA 2**

Waxaad tirisaa saddex isbeddel oo wanaagsan oo noloshaada la soo dersay intii aad heshay dabiicadda cusub. Ilaahay ugu mahadnaq isbeddeladan. Sidoo kale tiri saddex dabiicadood oo ka mida dabiicaddaadii hore oo weli noloshaada ku sii jira. Toddobaadkan dhexdiisa adoo Ilaah la kaashanaya, la dagaalladan dabiicadahan dhibta kugu haya.

**MURAAJACADA CASHARKA 2**

1 a) Marka qofku isku halleeyo Masiixa, isbeddelka ku imaanayaa waa maxay? dhalasho______

b) Haddaynu nahay xerta Masiixa aqoonsi noocee ah ayaan haysanaa? Waxaynu nahay _____________ Ilaah.

2 Dagaalkeenna ruuxiga ahi waxa uu u dhexeeyaa dabiicaddeennii [hore /cusub] ee dembiga miidhan ahayd iyo dabiicaddeenna [hore / cusub] ee ku jirta Masiixa *(qalad saar jawaabaha qaldan)*

3 Sheeg labo tusaale oo ah isbeddelka uu Ciise Masiix ku keeno nolosha kuwa isaga raacay
*(haddii aanad xasuusanin, eeg su'aalaha 11-12)*:
_______________________________________________________________________

4 Dusha ka qor adoo buuxinaya meelaha bannaan aayadda 2 Korintos 5:17:

*"Haddii qof _________ , ku jiro, waa _______ cusub; oo _______ way idlaadeen, wax walibana way _________ !"*

## JAWAABAHA CASHARKA 2

1 b)
2 Butros
3 jawaab shaqsi ahaaneed
4 dadka Ilaah doortay
5 a)
6 Maya (laakiin haddaanad hubin, la hadal la taliyahaaga)
7 doortay
8 balanbaallis
9 dhalasho
10 b)
11 a)
12 C
13 c)
14 a)
15 u diyaargarow falanqayn
16 b)
17 a) dabiicad hore b) dabiicad cusub
18 a) cusub b) cusub c) hore d) hore
19 u diyaargarow falanqayn
20 xafid aayadda

